**Kulanka Ardayda Jaamacadda Soomaaliyeed ee Caalamiga**
**Somali International University (SIU)**
**iyo**
**Guddoomiyihii Hore ee BJFS**
**M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari**

**Mowduuca:**

# CAQABADAHA HORTAAGAN DHISMAHA DAWLADDA SOOMAALIYA

Hotel Afrique-Muqdisho, 20[ka] Diseembar, 2020

## Arar iyo Ereybixinno

Inta aan gudagelin mowduuceena caawa, waxaa jeclahay inaan in yar ku hakano qalaadbixinta ereyo qalaad si aan isu xusuusino micnaha ay xambaarsan yihiin ereyo muhiim ah oo soo noqnoqda lana xiriira mowdooceena kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1) **Republic:** waa erey qalaad oo kasoo jeeda luqadii hore ee latiiniga, oo af Soomaaligana loo adeegsado Jumhuriya.
   a. **Luqad ahaan** *"Republic":* waa laba erey oo isku daba karan oo kala ah *'Res'* iyo *'Publica'* oo mid walba micnihiisu yahay 'Res': waa *'waxa'* + *'Publica'* oo loola jeedo *'dadka ama Shacabka'.*
   b. **Micno ahaanse** *"Republic":* waa wax dadku leeyahay, ama waxa taladiisu dadku leeyahay, waxayna ka tarjumeysa waxa dadku lahaa oo qof keliya ama boqor keliya ka talin jiray, taladii lagala soo wareegay oo noqday wax taladiisu dadku leeyahay.
   c. **Sharci ahaan** "*Republic":* waxaa loola jeeda Nidaam Dawladeed oo awoodda sare ee talada/xukunka dalka uu shacbigu leeyahay ama hadba ciddii uu u igmado oo ah wakiilladiisa. Waa Nidaam dawladeed ku dhisan qaab dastuuri ah oo Madaxa Dawladdu yahay mid shacabku doorto ama wakiillo shacbigu awood u siiyey ay u doortaan ama u magacaabaan.

   Haseyeeshee, si aan ujeeddada qaanuuniga ah usii fahamno waxaa halka fiiro mudan nuxurka sida ereygan laatiiniga ah ee *"Republica"* ay dawladaha Carbeed oo aan isu dhaqan dhownahay u tarjunteen *"Al-Jumhuuriyah"* oo luqad ahaan looga jeedo wax walboo kulansa tirabuurtiisa[1], hadaba micnaha ugu dhow Af-Soomaaliga waxay nala tahay in loo tarjimi karo "*Tolweynaha"*[2] oo micnul Jumhuuriya isugu soo uraraayo "*Nidaam-Dastuuri ah oo Talada Xukunka dalku uu iska leeyahay".*

   *"Tolweynaha"* Waa qaab xukuumadeed/dawladeed oo awoodda ugu saraysa uu iska leeyahay shacabka ama wakiiladda uu u doorto. Waa qaab datuuri ah oo Madaxa Dawladdu yahay qof loo doortay ama loo magacaabay.

2) **Democracy:** waa erey Greek ah *"Demokratia"* oo micnihiisu yahay Nidaam xukuumo awoodeedu dadku leeyahay ama uu u igmado wakiilladiisa, ama Hay'ad siyaasadeed ama bulshadeed oo awoodda ugu dambaysa ee xukunka ay wadar ahaan wada leeyihiin xubnaha hay'adda oo dhan. Sidoo kale waxaa lagu macneyn karaa "*Hirgelinta dhaqanka sinnaanta bulshada*" ama "*Xaalad bulshadeed oo la wada siman yahay, aanay ka jirin kala sarayn*"

3) **People/Shacab:** Marka aan ka hadleyno *"shacabka"* waxaa muhiim ah in aan lagu qaldamin dadweyne. Shacabku wuxuu ka kooban yahay wadarta muwaaddiniinta haysta jinsiyadda Dawladda, sida iyo shuruudaha lagu yeeshona waxaa xeeriya nidaamka qaanuunka dawladda, waxaana ka mid ah, u dhalasho, muddo dheer oo dalka la deggenaado, guursasho, siismo iwm;

4) **Citizen/Muwaadin/Daljire:** waa erey af-Carabi ah, oo erey mufrad ah jamaciisuna waa shacbi, waa qof deggan waddanka oo leh aqoonsiga jinsiyadda waddanka Jumhuuriyadda wuxuuna af Soomaaliga u dhigma *"Daljire"* oo dalkiisa ka jira oo xumaati kasta ka ilaaliya.

5) **Patriot/Waddani:** Waa qofka waddankiisa aad u jecel waxwalba, naf iyo hantiba u hura.

---

[1] Jumhuuru kullu shay'in mucthamahu ama jumhuuru naasi Julluhum
[2] Tolweynaha, waxaa loo soo gaabin kara "Nidaam Dastuuri taladu tolweynuhu leeyahay".

6) **Population/Dadweyne:** Wuxuu ka kooban yahay wadarta dadka dalka ku nool oo dhan oo isugu jira muwaaddiniinta leh jinsiyadda Jumhuuriyadda iyo dadka shisheeya iyo dadka dawlad-laawayaasha[3] ah ee geyiga dawladda ku nool oo hoos taga xukunka shuruucda dawladda.

   Waxyaalaha ay ku kala duwan yihiin shacbi iyo dadweyne waxaa ka mid ah: ka mid ahaanshaha shacbinimada waxay leedahay dhallan joogta ah, xeer ahaanna laguma lumuyo ka maqnaashaha dalka oo kmg ah, haseyeeshe ka mid ahaanshaha dadweynaha wuxuu leeyahay dhallan ku-meel-gaar ah oo deggenaashaha dalka muddo ku xiran.

7) **Nation/Ummad:** Ereyga *"Ummad"* waa erey oo shacab iyo dadweyneba ka duwan. Micnaha iyo nuxurka dhabta ah, oo uu ku fadhiyo ereyga Ummad: waa bulsho dabiici ah oo ku dhidibbo aasan arrimo dhallan-wadaag oo ay ka mid isir-wadaag; luqad-wadaag; taariikh; ama dhaqan oo ku qotoma dareen kalgajeceel ah oo u jimbacsan ka mid ahaansha *"ummaadnimada"*. Badanaaba ummadnimada kuma koobna xeendaab xuduudo joqraafiyeedka dawlad, oo waxay ummadnimada ka jiri kartaa xuduudaha joqraafiga ee dawlado badan, sida ummadda Islaamka.

   Arrinka ugu muhiimsan shacbiga xeeriya waa nidaamka qaanuuniga ah ee dawladda, dadweyne waxaa go'aamiya geyiga uu muddo go'an degan yahay, ummadna waxaa xeeriya dareen-wadaagga iyo jeceelka ka mid ahaanshaha ummadnimada.

   Haddii marba fahamka *"Shacbi"* uu si adag ugu xiran yahay nidaam-qaanuuniga, "daweynene" yahay mid ku xiran joqraafi *"antropogeografico",* hadaba fahamka micnaha kama dambayska ah ee *"ummad"* waa Hab sare oo fikri ah "*Ideale*".

8) **State/Dawlo:** Adeegsiga ereyga Dawlad ama *"Stato/State",* oo loo adeegsado micnahiisa iyo nuxurka uu xambaarsan yahay oo maanta loo yaqaan, wuxuu hirgalay keliya waagii dib-u-fufinta dhaqanka dalka Taliyaaniga *"period della rinascenza italiana"* oo dhaqan galay qarnigii 15$^{aad}$ ilaa qarnigii 16$^{aad}$, waxaa siiba si gaar ah ereyga *"Stato"* aad u hirgeliyey Machiavelli oo ku isticmaalay qoraalladiisa ku saabsana nidaam-siyaasadeedka iyo mabaadii'da xukun-dawladeedka *"scritti dottrinali"*. Ereyga *"Stato"* laatiini ahaan micnihiisu waa *"Xaalad" (condizione)* ama "sida la yahay ama sahda hadba lagu sugan yahay" *(modo d'essere).*

   Bulsho kasta qaab kastoo ay u agaasiman tahay waxay leedahay nidaam-qaanuuneed u gaar ah oo qeexaya nuxurka bulsho kastaba ay ka samaysan tahay.

   Nidaam-qaanuuneedka Dawladda kama hor dhasho Dawladda ee dawladda ayuu la dhasha kana tarmaa. Waxa dhab ah orohda caamka ah ee oranaysa "*meeshii dad joogoba dawlad (xaalad) baa ka jirta*", waxaa sidoo kale iyadana dhab ah orohda kale ee dhamaystirta oo oranaysa *"meeshii dawlad (xaalad) ka jirta xeerbaa ka jira."* waa halka ay kasoo tarantay bilowga micnaha casriga ah ee ereyga qalaad *"State"*

   Hadaba, waa maxay micnaha casriga ah ee fahamka *"dawlad"* loo fasiri karo, oo garwaaqsi-qaanuuneedkana waafaqsan? Heerka ugu sarreeya oo loo fasiri karo laguna soo bandhigi karo nuxurka ballaaran ee ku dahsoon fahamka micnaha Dawlad "Waa hay'ad bulshadeed oo leh dhul milkiyad asal ah, oo gobannimada iyo nidaam-qaanuuneedka ay wada hoos yimaadaan wax kasta oo ku gudonool xuduudaha dalkeeda, ujeeddooyinka/maqaasiidka laga wada leeyahay oo koobanna waa dhawraarin[4] iyo horumarin[5] - *(conservazione e progresso)"*.

---

[3] Dawlad-laawayaal waxaa loola jeedaa dadka dawladaha addunka ka jira midna jinsiyadna ka haysan. waa jinsiyad-laawe meelo qaarna loo yaqaan *"bilaa-duun"* ama *"apolide"* ama *"stateless"*

[4] Dhawraarin: waxaa loola jeeda dalka, dadka iyo danta guud oo xumo laga ilaaliyo. MAAHMAAH BANAADIRI "*Qofkii isdhowraa dhammaan-baxa*"

[5] Horumarin: Maslaxadd/danaha guud ee bulshada oo la ilaaliyo lana hormariyo).

**Waayadii ka horreeyey 1949:** Koofurta Soomaaliya waxaa lagu magaacaabi jiray *"Somalia Italiana"* oo waxaa muddo badan beeleysan[6] jirey Dawladii Fashistiga ahayd ee Taliyaaniga, haseyeeshee, Ururka Qaramaha Midoobay ayaa Dawladdii Cusub Dimuqraaddi ah oo ka dhalatay dalka Taliyaaniga aya ereg[7] ahaan u dardaarmay oo 21[kii] Nofeembar 1949 u dhiibay walaayada[8] maamul-dawladeedda Koofurta Soomaaliya, waxaana loo xilsaaray in muddo toban (10) sanno ah uu dalka ku gaarsiiyo isku fillaasho maamul-dawladeedka dalkooda ay u madaxbannaan yihiin kuna maamulan karaan, muddada maamulkaas loo yiqiin *"Amministazine Fiduciaria Italo Somalo"* markii laysku soo gaabiyana la oran jiray *"AFIS"*. Gobollada Woqooyiga dalkana wuxuu ahaa dal ku jiray ama ku daryeelsana Maxmiyadda[9] Midowga Boqortooyada Britain *"British Protectorate"* waxaana lagu magacaabi jiray *"British Somaliland"*.

**1949-1959: Waagii Garaad kobcinta iyo Baxaalliga[10] Dawladnimada Casriga:** Waa Dastuurka 1aad ugu horeeyey ee Soomaaliya ka hirgalay waa dastuurkii 21 Nofeembar 1949 lagu ansixiyey Kalfadhigii 250-aad Kulanka Guud ee Golaha Qaramaha Midoobay oo ku lifaaqan kana mid ah Heshiiskii Wassiyada UQM/UNO kula dardaarmay Dawladda Taliyaaniga inay muddo 10-sanno iskufillaasho Maamul Dawladeed shacbiga Soomaaliya u madaxbannaan yahay ku gaarsiiso Soomaaliya. Wuxuu dastuurkan ka koobna 17 Qodob oo ah Mabaadii' Dastuureed, oo sideed (8) qodob ka mid ah aan la wadaaganay dalalka Libiya iyo Eritrea iyo sagaal qodob oo Soomaaliya u gaar ah. Mabaadii'dan dastuureed waxaa soo diyaariyey loona xilsaartay Ergadii dalka Hindiya u fadhiyey UQM.

**1960-1969 – Waagii Hanaqaadka[11] Dhaqan-Dimuqraadiyadeedka:** Waa Dastuurkii 2aad ee Soomaaliya yeelatay laguna dhisay Jumhuuriyadda Soomaaliyeed ee Koowaad oo Madaxbannaan, waxaana lagu soo dhaqmay muddo toban (10) sanno ah 1960-1969. Dastuurka qabyo-qoraalkiisa wuxuu bilowday 1956 oo laguna soo gunaanaday Golihii Qaranka Soomaaliya[12] ee Koowaad oo ansixiyey 1960-kii, Afti Qaranna loo qaaday 1961 ka dibna lagu meelmariyey Xeer-Madaxweyne. Waagan waxaa lagu magacaabi kara waagii dhaqan-dimuqraadiyeedku dalka ka hirgalay, oo aan dalal afrikaan badan aan kaga hormarsanaan jirnay hirgelinta xorriyaadka iyo dhaqanka dimuqraaddiga.

---

[6] **Beelaysasho:** Qolo kale xoog ku qabsasho oo beel ka dhigasho; beelaysi; gumaysi; raaciye ka dhigasho; isticmaarsasho.

[7] **Eregta:** wax amaano ah oo la isu dhiibto; ama la is amaahiyo.

[8] **Walaayada maamulka:** *'Trusteeship'* ama *'Wasaayah'* – qaanuuniyan waa Dal gobannimadiisa leh hayeeshee dadkiisu lahayn aqoon iyo itaal ku filan oo ay iskood ku maamushaan arrimahooda dawladeed, dawlad kale lagala dardaaran loogu xilqaamo inay muddo kooban ugu dhisto kuna barbaariso maamul dawladeed casri ah, muddadaas go'an gudaheedna ku garaad kobciso ku gaarsiiso isku fillaasho ay arrimahooda maamul ay si madaxbannaan iskood u maamulan karaan, ilaa iyo goortaasna arrimaha maamulka ay ereg ahaan ayada usii hayso.

[9] **Maxmiyadda:** Qaanuniyan waa dawlad dawlad kale oo ka itaal roon ay ballan kula gasho (heshiis) in ay difaacdo oo daryeesho shakhsiyadeeda qaanuuneed ee dawladnimo iyo in ay maamusho qaar muhiim ah oo ka mid arrimaheeda dibadda. Dawladda la daryeelayo ma lumineyso gobannimadeeda ee awoodaheeda gobannimo qaar ka mid ah oo muhiim ah bey maamulkooda u wakiilanaeysa dawladda kaloo ka itaalka roon.

[10] **Baxaalliga:** waa dadka sida wax loo qabto lagu tababbaro, habka wax loo fuliyo lagu baxnaaniyo wixii la barayna lagu tijaabinayo lagu hubiyo inuu karti u yeeshay oo hanaday.

[11] **Hanaqaadka:** filka wax lagu hanan karo gaaray; tabargalay. Hanad noqday oo dhulka ama dadka ama wax kale uu gacanta ku hayo uu maamuli karo u talin karo.

[12] **Golaha Qaranka Soomaaliya**: muddada 1959-1969 Golahan waxaa lagu magacaabi jiray *'Assemblea Nazionale della Somalia/Somali National Assembly'* – Ereyga *'Golaha Shacabka'* edeegsigiisa wuxuu bilowday 1979 – markii la sameeyey dastuurkii 1979.

**1969-1979 - Waagii Kacaanka – Wajiga 1-aad:** Oktoobar 1969 waxaa xukunka dalka qabsaday Ciidamada Qalabka Sida, oo ku dhaqankii dastuurkii 1960 iyo jiritaanka Axsaabta Siyaasadeedba wada laalay lana wareegay dhammaan awoodihi xilalkii dastuuriga Laanta Sharcidejinta, Laanta Fulinta, xilalkii Madaxtooyada iyo Laanta Garsoorka. Labaatankii sano dalku ka talinaayey kacaanka, tabankii (10) sanno ugu horreeyey ay dawladaasi haysay 1969 ilaa 1979, oo aan ugu magacdarnay wajiga 1-aad waagii Kacaanka, dalka dastuur kama jirin waxaa lagu dhaqayey warqadda 1-aad oo Golihii Sare ee Kacaanku *(GSK)* soo saaray 21$^{kii}$ Oktoobar 1969 ku saabsanayd Barnaamij siyaasadeedka dalka ka fulinayaan, iyo warqadda 2-aad, lasoo saaray 21$^{kii}$ Oktoobar 1970 oo GSK ku guddoonsaday in dalka lagu dhaqo Mabaadii'da Hantiwadaagga Cilmiga *"scietific socialism"* ku dhisan; iyo warqadda 3-aad ee GSK soo saaray 1$^{dii}$ Luuliyo 1976 oo lagu dhisay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed (XHKS).

**1979- 1990 - Waagii Kacaanka – Wajiga 2-aad:** Sanadkii 1979 ayuu Golahii Shacabku ansixiyey Dastuurkii 3-aad Afti Qaranna loo qaaday waana Dastuurkii lagu dhisay Jumhuuriyaddii 2-aad oo loogu Magacdaray Jumhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, dalkana lagu soo dhaqay waagan dambe ee Kacaanka 1979-1990, waxaana dalka lagu dhaqayey nidaamka xisbiga keliya iyo mabaadii'da hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan ee Guddoonka Dhexe. Haseyeeshee dabayaaqada muddadan dhexdeeda 1989-1990 waxaa loo hawlgalay dejinta Dastuur loogu gol lahaa wax-ka-beddelka nidaamkii jiritaanka halka xisbi keliya oo looga guurayey nidaamka axsaabta badan iyo Ismaamul-Goboleedyo Madaxbannaan *(Automia Regionale)* oo Golahii Shacabka ansixiyey 12$^{kii}$ Oktoobar 1990. Dastuurkan 1990 waxaan oran karnaa in uu yahay Dastuurkii 4-aad ay Soomaaliya soo yeelatay maadaama uu ilaa xad soo maray habraacii dastuurdejinta, Golihii Shacabkuna ansixiyey in kastoo uusan dalka ka hirgelin. Hirgalla'aantiisana waxaa u sabab aha kacdoonkii dadweynaha oo dalka ka aloosmay dabyaaqadii Diseembar 1990 awgeed.

## CAQABADAHA FARAGELINTA SHISHEEYE

Faragelinta shisheeye la xiriirta dawlda dhisidda ama dib u dhisidda dawladanimada Soomaaliya waxay aad usoo ifbaxday burburkii dawladda dhexe oo ku beegan 1991 iyo wixii ka dambeeyey ilaa iyo maanta.

Ereygan *"State building"* ama xarfiyan Dawlad-dhisidda waxaa looga jeeda Dib-u-Yagleelidda dawlad xilgabtay *"failed state"*. Xilka ama hawlgalka ugu weyn ee Dawlad-dhisidduna waa in la abuuro/la aasaaso dawlad shacbigeedu u arko inay tahay dawlad leh sharciyad shacabku siiyey, oo xukunka awoodaheeda xukuumadeedna sharci yahay in shacabka loogu adeego loona adeegsado. Tan ayaa ah shardiga lagama maarmaanka ah loo baahan yahay xukun dawladeed wax-ku-ool ah, oo si sugan u nagaada, oo timaaddo dheer sii jirta.

Dawladaha shisheeye ee caalamiga ah oo isku daya in ay dawlad-dhisid ugu hawlgalaan dal ku yaal meel dalkooda ka fog, una diyaar ah inay dusha u dhigtaan culayska kharajka ku baxaya dawldad-dhisidda, waxaa marag madoonto ah in dawladahaasi ay dano waaweyn ka leeyihiin nidaam siyaasadeed dalkaasi yeelan doona mustaqbalka. Saaa daraadeed, waxay u hawlgalayaan oo hormarinayaan dhismaha madaxda dawladda u heelan ujeeddooyinkooda una diyaar ah fulinta yo hirgelinta danaha hadba la habboon dawlad-dhisaha.

Haddii, marar dhif ah ay dhacdoba, in danaha shacabka dawladda loo dhisayo iyo danaha dawlad-dhisayaasha shishisheeye ay is waafaqaan, haddii ay u hawlgalaan in ay dhisaan Madax *"daacad u ah"* ama u hoggaansan dawlad-dhisayaasha hawlgalkaasi waxay wax weyn u dhimaysa sharciyadda madax-dawladeedka wuxuuna dhuminaya kasoonida shacbiga. Ma dadwlad sharciyad leh buu dhisaa mise dawlad madaxdeeda u daacad ah danaha dawlad-dhishaha, taasina wa walaaca dawlad-dhisaha shisheeye.

Hadba inta ay buurnaan le'eg tahay danta dawlad-dhisaha ka leeyahay dalka dawladda loo dhisayo ayey faragelintiisuna gaarsiisan tahay; hadba inta uu gaarsiisan yahay culayska hantida badan ka geleysa hawlgalka dawlad-dhisidda ayey u badan tahay in uu dhiso una dhidibbo-dhigo madax-dawladeed u daacad ah danahiisa, madax-dawladeedka tabtaa lagu dhisayna laga sugimaayo inuu dalkaas si sharciyad leh ku xukumo.

Waxaa wax laga xumaada ah, sidaan kusoo aragnay hawlagalladii Midowga Dawladaha Maraykanka, in hadba intay buurnaan weyn leeyihiin danaha dawlad dhisaha bey u badan tahay in lagu guuldarraysto dhisid dawlad-sharciyad leh oo iskeed usii jiri karta mustaqbalka fog.

Sida qaalibka ah, hawlgallada Dhismo-dawladeedka shisheeye, sida badan waa lagu guuldarraysta. Haddii aan tusaale u soo qaadano wadamada Haiti, Soomaaliya Afghanistan iyo Ciraaq ma aha keliya dawlado iskood u xilgabay *"failed state"* ee isla markaana waa hawlgallo dawlad-dhisidda dawladaha caalamiga ku guuldarraysteen *"state building failures"*

**1991-2000 – Waagii gudcurka[13]:** Tobankan (10) sanno waa waagii ugu xumaa Soomaaliya soo maray. Gadoodkii shacabka oo in muddoba hoos ka guuxayey ayaa isu rogay kacdoon[14] shacabi dalka ku wada baahsan. Dawladii Dhexe Kacaanka dalka oo ka jirtay way xilgabtay[15], kacdoonkii shacbiga wuxuu isu beddelay dagaal sokeeye, dadkii waa laysugu diray, laysugu dilay loona kala dilay ilaa heer ay tooyasho[16] isku dilaan, ma aha keliyan in waagan ay dawladda dhexe iyo hay'adihii dawladuba burbureen ee waxaa halis galay oo sigtay bedqabkii[17] geyiga dawladda wax weyn loo dhimo. Waxaa intaas kasii daran in waagan ay burbureen waxyaabihii Dhaqan-wadaaga dadka Soomaaliyeed maguuraan u ah oo siinaya midnimo asal ah[18] *"natural unity"*. Waxaa dadka aad loogu buunbuuniyey waxyaabaha yar yar ee kala qaybiya, waxana laga indhasaabay loona micnodarreeyey arrimaha waaweyn oo Allahu swt noogu deeqay ee mideeya shacabka, ayadoo midnimadaas asalka oo run ahaantii sinna looga maarmi karin dhismaha nidaam dawladeed ee federaal ah. Waxaan waagan ku tilmaami karna wagii midnimada shacabka, beqabka dalka iyo dawladnimada Soomaaliyeed ay gudcurro xun wada galeen. Mahad Allaa lehe, Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Somaaliland iyo Puntland ayaa sanadihii ugu danbeeyey ee ka badbaaday oo ku guuleystay gundhigga aasaaska lagu dhisayo nidaamka iyo maamulo dawladeed.

---

[13] **Gudcurka:** Mugdiga

[14] **Kacdoon:** wax gardarro ah oo daweynuhu ka gadoodo oo keena isbeddel samaayn weyn leh oo qaranka gudihiisa ka dhaca.

[15] **Dawlad xilgabtay** *"Failed state"* xilkii xukunka dalka gudan weysay oo gabtay, taladii dalka gacanteeda ka baxday.

[16] **Tooyasho:** ama toyoysi haybin qolo ama qabiilka aad tahay lagaa waraysto; haybraac

[17] **Bedqabka:** wax loo dhimin oo sidiisi isuqaba oo iin aan loo geysan, wax laga goosan *"integrity"*

[18] **Midnimo Asal ah**: *"Natural Unity"* waxyaalaha ummad mideeya waxaa ka mid ah Diinta; Dhaqanka; Dhiigga; isirka; Luqadda iwm.

**2000 – 2011 - waa waaga Dib-u-fufinta[19] nidaam dawladeedka dalka:** *"periodo della rinascenza"*. Waa bilowga u dadaalgelidda dib-u-heshiin iyo baadigoob nidaam dawladeed. Waa waagii la qaatay nidaamka federaaliga layskuna afgartay in lagu soo celin karo dawladnimada iyo kalsoonida shacabka. Waxaa 2004 la ansixiyey Axdigii Federaalka ku-meel-gaarka ahaa oo noqday Dastuurka 5-aad, haba taag darnaatee dib loogu dhisay dawladdii Dhexe ee Federaalka oo kmg ahayd. Qaanuniyan Cahdiga kmg ah waxaan oran karna in yahay dastuur maadama uu Cahdigu xeerinaayey kuna tiirsana in wixii asaga laga waayo loo raaco Dastuurki 1960kii. Dadaallada waagan lagu guulaystay waxaa ka mid in 2010 uu Guddiga IFCC, oo in muddo ahba ku hawlanaa dastuurdejin, uu soo saaray qabyoqoraalkii dastuurkii loogu talagalay *"Qabyoqoraalka Dastuurka la-tashiga dadweynaha*" oo soojedimihiisu ay ka mid ahaayeen saddax nidaam oo lagu salayn karo qaab-dhismeedyo dawladeed kala nooc ah hadba kii la doorbido. Hayeeshe, sidii la doonaayey looguma hawlgelin, waase dokumenti nuxur leh qaanuun ahaana looga faa'deysan karo, nuxurkiisan saamayn weyn bu yeesay Dastuurka Federaalka hadda jira. Guddigii IFCC oo lagu laray Guddi Khubaro oo ka kooban sagaal (9) xubin, waxay 2011-kii haddiiba dib ugu hawlgaleen wacyigelin dastuureed iyo la-tashi dadweyne iyo ururinta ra'yiga iyo talooyinka shacabka.

**2012 – 2020 – Waagii Ilayska "*illuminismo*":** waagan waa sanadihii ilayska dawladnimada Soomaaliya uu soo ifbaxay. Waxaa waaga dhammaan mas'uuliyiinta hoggaanka heer qaran, iyo siyaasiyiinta sare ee mattalaayay bulshada, odayaasha dhaqanka iyo ururrada bulshada rayadka ay hawlgallada dhisidda hay'adaha dawladda wadajir isula heleen, si kastoo ay kala ra'yi duwanaayeen, hadana si joogto ah ayey kulamadooda u taxanaayeen oo hawlahana si xowli ah bey u wadeen. Bishii Maarso 2012 Guddigii IFCC iyo Guddigii Khubarada waxay wadajir usoo saareen Qabyoraalka Dastuur nuxur ahaan iyo qaanuun ahaanba si maangal ah u dhisna kuna dhan yihiin xataa qodobbada wadaxaajoodka siyaasadeed ee muhiimka ah. Qabyoqoraalkan waxaa loo gudbiyey saxiixayaalkii ka koobna lixda (6) xubin oo hoggaaminayey arrimahan, waxayna qabyoqoraalkaasi kaga soo baaraandegeen kuna soo warceliyeen muddo gaaban oo saddax (3) bilood ayagoo Qabyoqoraalka meelo dhowr ah wax-ka-beddeley qodobbo badanna kasoo tirtiray.

Isla markaas saxiixayaalka waxay magacaabeen Guddi Farsamo oo hawsha kala wareegay labadii Guddi horey usoo diyaariyey. Guddigan dambe ayaa dib-u-eegid farsamadeed ku sameeyey, oo horgeeyey ergooyin shacabka laga soo xulay oo 1[dii] Agoosto 2020 si ku-meel-gaar ah u ansixiyey Dastuurka 6-aad ee Soomaaliya oo Federaal ah. Waagan wuxuu astaan yahay laguna guulaystay ka bixidii ku-meel-gaarnimada iyo bilowgii dhisidda Jumhuuriyadii 3-aad ee Soomaaliya oo Federaali ah, marxaladaas oo weli lagu gudajiro. Waxaa kaloo lagu guulaystay dhisidda dawlado-Goboleedyada xubin ka ah federaalka Soomaaliya, waxaase weli loo baahan hirgelinta mabaaadii'da federalismaha iyo dhisidda hay'adaha dhiman iyo u dhidibbo aasidda hay'adaha heer qaran iyo heer Dawlado-Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose ee degmooyinka dalka iyo fidinta awoodaha iyo xilal-dawladeedka oo hoos loo dhaadhiciyo. Waxaanu galnay waagii ilayska *"illuminismo"* oo u baahan hawlgallo badan, wadaxaajood iyo iskaashi walaaltinimo iyo wanaagga guud awgiisa oo laysugu tanaasulo.

---

[19] **Dib-u-fufidda**: *"Rinascenza"* Sida geedka markii la gooyo gumudka jirridiisa muddo dhulka ku haray markuu biyo helo dib usoo dhasha; ama dhirta iyo cawska xoolaha kor ka daaqa oo dib usoo dhasho, usoo fufa.

Sidaan kusoo aragnay taxanaha kala muddaysan ee kor ku xusan, waxaa muuqata in Soomaaliya ay tabankii (10) sanoba gasho xaalado cusub oo horumar ama dib-u-dhacba leh. maalmaha ka dhiman sanadkan aan ku jirno ee 2020, waxaa Soomaaliya u buuxsamaya todobaatan (70) sano oo kasoo waregtay taniyo markii ay gashay baadigoob iyo tijaabooyin ay ku yeelato dawlad casri ah oo leh gobannimo buuxda iyo isku fillaasho maamul dawladeed ay danaha guud ee dadka, diinta iyo dalka ku maareyso iyo dawlad-wanaag dastuur lagu kala dambeeyo.

Sida ay oddorosayaan ogaalleyda falanqeeya is bedellada xaaladaha adduunka iyo xawliga uu ku socdo horumarka sanaacada iyo teknojiyada waxay sheegayaan in dawladaha waaweyn ee addunka ay u tooghayaan isuna diyaarinayaan in sanadkan 2020 wixii ka dambeeya uu caalamku yeelan doono nidaam cusub caalami ah oo ka duwan midka aan hadda ku sugannahay. Waxaan Allahu swt ka baryeyna inta hartay sanadkan iyo timaaddada xigtana uu na waafajiyo sida Rilladiisa ku jirto, nooguna deeqo nabad iyo caqli iyo itaal aan ku maarayn karno wanaagga guud oo u roon hormarka dalkeen iyo dadkeena, iyo madax Lillahi qabta uu Asaga swt tubta toosan ku hoggaamiya na waafajiyo – Aamiin.

****************** **DHAMMAAD** ******************